

# Talaabooyinka Habraaca Xaraashka Kastamada

## Talaabo 1

### •XAQIIJINTA BADEECADDA/ALAABADA

- Maamulaha Kastamka ayaa xaqiijinaya alaabooyinka nidaamka xaraashku ku waajibay (alaabooyinka lala wareegay, ku wa la xanibay ama wakhti dheer yaalay Kastamka);
- Maamulaha Kastamka ayaa samaynaya guddi xaraash oo heer Kastam ah, si ay u ansixiyaan liiska, uguna diraan Agaasimaha Waaxda Kastamada.

## Talaabo 2

### •GO'AANKA AGAASIMAHA WAAXDA KATAMADA

- Waxa uu go'aaminayaa in alaabada/badeecadda ay isticmaalaan/ka faa'iidaystaan Kastamadu; ama
- In la burburiyo alaabada/badeecadda; ama
- In la xaraasho alaabada/badeecadda.

## Talaabo 3

### •GUDIDA QIIMAYNTA XARAASHKA

- Alaabada/badeecadda la xaraashayo waxa qiimayna Guddi Qiimayneed, "Qiimaha jumladana"-na ku qiimaynaya;
- Taariikhda Xaraashka ee la isku raacayna, Gudida Qiimaynta ayaa go'aaminaya;
- Gudidu waxa ay dhamaystirayaan Liiska/Diiwaanka xaraashka oo sheegaya Taariikhda/Waqtiga Xaraashka, faahfaahinta iyo tirada xaraashka iyo qiimaha jumlada ee suuqa ay ka marayso.

## Talaabo 4

### •WARGALINTA XARAASHKA

- Waaxda Xidhiidhka Dadwaynaha ee WHM (MoFD) ayaa ku xayaysiinaya alaabada la xaraashayo Mareegta WHM (MoFD Website), Wargayska Dawladda iyo Wargays Madaxbanaan;
- Liiska Xaraashka ayay u dirayaan Rugta Ganacsiga (CoC), Ururada/Kooxaha Ganacsiga ee Waddaniga ah. Sidoo kale waxa ay ku soo bandhigayaan/ku soo dhajinayaan Xarunta Dhexe ee Kastamka iyo Kastamka Xaraashku ka dhacayo.

## Talaabo 5

### •SOO EEGISTA AY DADWAYNUHU SOO EEGAYAAN ALAABADA

- Kastamada ayaa diyaarinaya/go'aaminaya Taariikhda/Waqtiga la soo eegayo alaabada la xaraashayo;
- Dhamaan dalbadayaasha xaraashka, waxaa loo tixgalinayaa in ay iska eegaan alaabada/badeecadda.

## Talaabo 6

### •SHURUUDAHA DALBADAHA BADEECADDA LA XARAASHAYO

- Waa in uu yahay reer Somaliland, da'diisuna ka wayntahay 16 jir;
- Waa in uu leeyahay Lambarka Tixraaca Cashuur Bixinta (TIN) iyo Liisanka Soodajinta ee Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha.

## Talaabo 7

### •AQBALAADDA QANDARAASKA (BID)

- Kastamadu waxa ay aqbalayaan qandaraaslaha BID-ka ugu sareeya, qandaraas luhuna waxa uu bixinayaa lacag qadmiinaada oo dhan boqolkiiba 50% qiimihii BID-ka;
- Baaqigana waxa uu ku bixinayaa, mudo todoba cisho ah.

## Talaabo 8

### •XAQIIJINTA IIBKA

- Kastamada waxa ay siinayaan qandaraaslaha dukumanti xaqiijinaya iibka alaabada;
- Dukumantiga waxaa isticmaalaya qandaraaslaha, si uu u xaqiijiyo in ay Kastamadu sii daayaan alaabadiisa.

## Talaabo 9

### •DIDA LOO KALA HELAYO QIIMAHA LAGU IIBIYAY

- Kharashka maamulka xaraashka, Kharashka takaaliifta iyo cashuuraha, khidmadaha (fees), iyo ganaaxyada Kastamka;
- Kharashkii muddo dhaafka/Kharashkii dakadda ee hawl wadeenada Bakhaarka alaabada/masuuliyiinta Dakadda;
- Baaqiga waxaa lagu haynayaa xisaab laga furayo baanka (account) mudo 2 bilood ah;
- Kharashaadka ay sheegtaan gaadiidka/soo dajiyaha, mudo 2 bilood ah waa laga siinayaa dakhliga.